

# **Wargeyska Mountain View**

## **Nofeembar 9, 2016**

**Talaado, Nofeembar 22.....Waalidiinta iyo Macmacaanka, CLC marka ay tahay 8:30**  
**Arbaco, Nofeembar 23.....Ma Jiro Dugsi (Nasashada Mahad Celinta)**  
**Qamiis, Nofeembar 24.....Ma Jiro Dugsi (Nasashada Mahad Celinta)**  
**Jimco, Nofeembar 25.....Ma Jiro Dugsi (Nasashada Mahad Celinta)**

### **Fariinta Agaasimaha**

Waxaa la soo gaaray waqtigii sannadka marka heerkulka isbaddalo. Waxaan rabaa in aan ka hadlo dhowr arrimood oo ka dhasha marka tani lala kulmo.

Walwalka kowaad wuxuu yahay in la gaaray waqtigii sannadka marka ardayda badanaa meel qaldan dhigtaan koodadka, jaakooyinka, iyo funaanadaha korka laga qaato. Waa qabow subaxnimada marka ay yimaadaan dugsiga, hase ahaatee waxay dareemaan xoogaa kuleel waqtiga nasashada ama marka ay joogaan meelo kale oo ka tirsan dugsiga, in ay iska saaraan jaakooyinka. Marmar waxay ku dambeyaan in ay ku iloobaan meesha ay uga tageen. Waxaan kugu dhiirigelineynaa in aad magaca cunugaada ku qortid labbiskiisa. Waxaan kaloo kugu dhiirigelineynaa in aad fiirisid dambiishena la geliyo waxa lumay lana helay haddii shay ka maqan yahay cunugaada.

Marka labaad, waxaan kaa codsaneynaa in caruurta adkeyaan heerarka labbiska dugsiga xattaa marka ay qaboow tahay. Ardayda qaadata koodadka, daboolka madaxa, iyo labbiska kale ee kulul waxay waxyaabahaas ku qaadan karaan midabada labbiska dugsiga, ama waa iska saari karaan kaddibna waxay ku haysan karaan lokarada waqtiga waxbarashada. Marka ay dibadda u baxaan, waxay qaadan karaan midab kasta si ay u kululaadaan, iyo kaddib marka ay ku soo noqdaan gudaha, waxaan ka codsanaa in ay iska saaraan koodadka aan waafaqsaneyn midabada labbiska dugsiga marka ay ku soo noqdaan fasalka.

Ugu dambayn, waxaa la soo gaaray waqtiga sannadka marka aan u nugul nahay in aan xanuunsano. Waxaan aragnay arday iyo macalimiin qaaday "flu", hargab, iyo cuduro kale oo kala duwan. Waxaan ardaydena ku dhiirigelineynaa in ay isticmaalaan warqadda fasaleetiga marka ay taabtaan sanko, si ay u daboolaan afkooda marka ay qufacaan, iyo in ay in badan dhaqaan gacmahooda. Waxaan kaa codsaneynaa in aad adigana caruurtaada ku dhiirigelisid in ay sidaas oo kale sameyaan. Marka xanuunka naga yaraado, markaas ayaan wax badan baran karnaa.

Waad ku mahadsan taageerada aad kaa geysatid arrimahaan!

### **Waalidiinta iyo Macmacaanka**

Agaasimeyaasha waxay jecel yahiin in ay kula kulmaan, kula qeybsadaan waxa ku cusub Mountain View, iyo in ay ka jawaabaan su'aalaha laga yaaho in aad qabtid. Wada hadalkena xiga ee loo qaban doono Waalidiinta iyo Agaasimeyaasha waxaa lagu qaban doonaa Community Learning Center (Xarunta Waxbarashada Bulshada) maalinta Talaadada, Nofeembar 22, marka ay tahay 8:30. Waxaan rajeyneynaa in aan halkaas kugu aragno.